



## Dugsiyada Ddweynaha Boston

# Nidaamka Degenanshaha

### JAWAABAHA SU'AALAHADA BADANAABA LAYSWADIYO

#### Waa maxay nidaamka degenanshaha DDB?

Sanada 2004, Guddiga Dugsiyada Boston waxay ansixiyeen nidaam cusub ee degenanshaha Dugsiyada Boston (DDB). Nidaamka cusub, ee uu ku taliyey Agaasime Guud Thomas W. Payzant, waxa loo hindisey ku gacan siinta xaqiijinta in qoysaska ku nool Boston oo keliya ay u banaan yihiin fursadaha waxbarashada laga bixiyo Dugsiyada Dadweynaha Boston. Nidaamka waxa ku jira qeexid khaas ahaan sii dheer ee "degenanshaha" Dugsiyada Dadweynaha Boston oo dhan, shuruudo dheeraad ah oo adag ee degenanshaha, iyo ciqaabo adag ee qoysaska lagu dhigayo ku xadgudba nidaamka degenanshaha.

#### Sidee loo qeexayaa "degenanshaha" Boston?

Siduu u galo Dugsiyada Dadweynaha Boston, ardaygu waa inuu runtii degen yahay Magaalada Boston. "Degenanshuhu" waa meesha qof ku nool yahay joogto ahaan, ee maaha kumeel gaadh ahaan, waana meesha rugta u ah isaga ama iyada xagga nololsha, dhaqan ahaan iyo shacbi ahaan. Degenanshaha ku meelgadhka ah ee Magaalada Boston, ee ujedada keliyi tahay gelitaanka dugsi Boston ku yaal, looma aqoonanayo degenansho.

Degenanshaha ilmo yar waxa loo haystaa meesha sharci ahaan waalidka ama koriyaha ilmaha qof ahaan gacanta ku haya. Ardaygii 18 jir ah ama ka weyn waa inuu cadeeyaa meesha uu degen yahay ee ka duwan meesha waalidkiisu/waalidkeedu ama koriyuhu degan yahay siduu u galo dugsi.

#### Sidee DDB u cadaynayaan degenanshaha Boston?

Qoysaska iska diiwaan gelinaya Dugsiyada Dadweynaha Boston ama keenaya isbedel cinwaan waa inay ku cadeeyaan degenanshahooda Boston waraaqo midiba sadex nooc mid ahaan ka socoto (fiiri hoos). Wac Xarumada Wartarmada Qoyska (FRC) ama ka eeg "website" DDB ([www.bostonpublicschools.org/residency](http://www.bostonpublicschools.org/residency)) liiska buuxa ee loo aqbali karo degenansho.

Si loo xaqiijiyo degenanshaha, DDB waxay meel dhigteen xuquuqda ah codsiga waraaqo dheeraad ah iyo/ama samaynta baadhitaan. Iyadoo degenanshaha ardayda ama qoysaskoodu isbedeli karaan sanad dugsiyeedka gudhiisa, DDB waxay xaqiijin karaan degenanshaha waqti kasta.

#### Maxa jira hadaanan haysan cadaymaha degenanshaha loo baahan yahay marka diiwaangelin samaynayo?

Giddi codsadeyaasha cusub oo dhan waxa laga rabaa

soo bandhiga sadexda cadaymood. Codsadeyaasha aan wadan waraaqaha laga rabo waxa loo sheegayaa inay xarunta ku soo noqdaan iyagoo wata waraaqaha haboon si loo diiwaan geliyo. Shaqaalaha "FRC"-gu ma ogolaanayaan wixi kalee ku maakuban cadaymaha la aqbali karo.

#### Maxaa jira hadaanan heshiis kiro guri haysan?

Hadaadan kirada guri bixin ("bil-ila-bil") aadanna haysan heshiis kirobixin, weydiiso hantiilaha guriga buuxinta iyo saxeexa xaanshida maragga (affidavit) hantiile/wadabixinta kirada taasoo laga heli karo Xarumada Waxtarmada Qoyska (FRC) ama "website"-ka [www.bostonpublicschools.org/residency](http://www.bostonpublicschools.org/residency). Taas, iyo warqadii kirada ugu dambaysa lagu bixiyey, ayaa buuxinaya cadaynta degenanshaha shuruuda qaybta "A". Maaha inuu yimaado hantiilaha gurigu waqtiga diiwaangelinta, mana aha warqada maraga in notaayo la geeyo.

#### Maxaan ku cadayn karaa bixinta kiro dhowaan ah ama bixinta deyminta guriga (mortgage)?

Waxad keeni kartaa nuqul "money order", jeek banki la tirtiray, ama cadayn kirada bixinteeda. Waxad kalee keeni kartaa nuqul xisaabcelin banki ee tusaysa in joogto lagaaga goosto kirada deyminta guriga.

#### Maxaa jira hadaan guriga leeyahay aanse haysan warqadii lahaanshaha (deed)?

La xiriiir shirkada maaliyada ee ku shuqul leh deyminta guriga ama waaxda Lahaanshaha ee Degmada "Suffolk County Registry of Deeds" (24 New Chardon St., Boston, [www.suffolkdeeds.com](http://www.suffolkdeeds.com), 617-788-8575).

#### Maxaa jira hadaan guriga leeyahay aananse deymintii bixin (waa hadaan lacagtii guriga bixiyey)?

Hadaan gurigaaga wax lacaga lagu lahayn, waa inaad keentaa nuqul ah lahaansho, iyo nuqul ah inaad deymintii aad wada bixisay. Taasi waxay kugu caawinaysaa cadaynta shuruuda Qaybta "A".

#### Maxaa jira hadaanan bixin "utility"-ga, ama aan biilasha "utility"-ga midna magacayga ku qornayn?

Hadaad ku nooshahay guri lacagayowga "utility"-ga oo dhan qof kale ku qoran yihiin, IYO hadii taasi ku caddahay warqadda kiraynta (lease) ama wargada maragga hantiilaha/wadabixinta kirada, markaas waxad ku bixin kartaa cadaynta degenanshaha ee Qaybta "B" magaca hantiilaha ama qofkaad la degen tahay. Hadii haeshiiska kiradu dhigayo in "utility"-ga oo dhan kirada la socoto, oo aadan lahayn telefan khadka dhulka mara

ama “cable television”, shaqaalaha “FRC” ayaa xaqiinaya xogtan codsigaagana waa la dhamaynayaa

### **Biilka “cell phone” ma loo aqbali karaa cadayn buuxinaysa Qaybta “B”?**

Maya. Waxa kaliyoo la ogol yahay biilka telefanka guriga (“khadka dhulka”) xagga shuruudan.

### **Maxaa jira hadaan dhowaan soo guuray aanan weli helin biilasha “utility”-ga?**

Sidaad u buuxiso shuruudaha Qaybta “B”, waxad ka keeni kartaa shirkadaha “utility”-ga warqado tusaya inaad dalabtay adeegaas ama lagu soo geliyey

### **Maxaa jira hadaanaan sadexda cadaymood wada buuxin karin?**

Hadii arrimahaaga gaarka ahi ayan suurto gal ka dhigayn inaad keento cadaynta shuruudaha sadexda qaybood ee degenaanshaha, la tasho shaqaalaha Xarunta “FRC”. La kaalay wixi cadayn aad haysid ee degenaansho, una sharax duruufaha kuu diidaya inaad hesho cadaymaha lagaa rabo oo idil. Shaqaaluhu waa ku gacan siinayaan, hadii loo baahdona, buuxi codsiga racfaanka. Codsiyada racfaankoo dhan waxa eegaya Agaasimaha “FRC” waxana loo gudbinayaa Xafiiska Agaasimaha Guud si go’aan looga gaadho.

### **Maxa jira hadaan la noolahay saaxiib ama qaraabo?**

Hadaad aqal kula jirto saaxiib ama qaraabo, waxad isticmaali kartaa warqada maragga heshiiska hantiilaha/wadabixinta kirada (ee laaga helo “web site”-ka iyo Xarumada “FRC”) sidaad u buuxiso cadaynta shuruuda Qaybta “A”. Weydii saaxiibka ama qaraabada buuxinta iyo saxeexa warqada maragga ee cadaynaysa degenaanshahaaga.

Hadaad si aan joogto ahayn “ugu soo degtey” saaxiib ama qaraabo duruuf dhaqaalo xumo awgeed, ama adoo hoy waayey, ama sabab la mid ah, waxa lagu aqoonsan karaa hoylaawe sida uu dhigayo Sharciga “No Child Left Behind (NCLB) Act”. Qoysaska hoylaawaha ah loogama baahna inay keenaan cadaymaha degenaanshaha. Fadlan la xiriir Hay’ada DDB ee “Homeless Student Initiative” (617-635-8037) ama shaqaalaha Xarunta “FRC” oo kugu caawin kara diiwaangelinta ilmahaaga.

### **Maxa jira hadii reerkaygu hoylaawe yahay?**

Cadaynta nidaamka degenaanshuhu ma qabanayo ardayda iyo waalidiinta hoylaawaha ah. La xiriir Hay’ada DDB ee “Homeless Student Initiative” (617-635-8037) ama u tag Xarumada “FRC” midkood si laguugu caawiyo diiwaangelinta ilmahaaga. Hadaad ku jirto xarun hoylawe (shelter), ka soo qaado warqad shaqaalaha meeshaas ee cadaynaysa inaad la nooshahay.

### **Maxaa jira hadaad tahay galti aan sharci ahayn?**

Ilmo kasta ee reerkoodu ku nool yahay Magaalada Boston waxa loogu ballan qaadayaa waxbarasho lacag la’aan ah ee Dugsiyada Dadweynaha Boston. Qoysna

loogu diidi mayo gelitaanka dugsi sababtoo ah duruuflooda galtinimo. Qoysaska galtida aan sharciga lahayn ee la nool saaxiibo ama qaraabo waxa loo aqoonsanayaa kuwo “hoylawe” ah (fiiri kor).

### **Waraaqaha aan u keeno cadayn degenaansho ma ahaanyaan qarsoodi?**

Wixi waraaqo loo keeno cadayn degenaansho waxa lagu qorayaa magaca ardayga waaxayna ahaanayaan kuwo kamid ah diiwaankiisa qarsoodi. DDB way u hogaansan yihiin xeerarka qarsoodi ee ku xusan sharciyada gobolka iyo fedraaliga ee daryeelaya diiwanadaas. Wixi xog dheeraad ah ee diiwaanada qarsoodiga ardayda, ka fiiri *Hagaha Dugsiyada Dadweynaha Boston ee Qoysaska iyo Ardayda*.

### **Sidee nidaamka degenaanshaha loogu isticmaalaa dugsiyada imtixaanka?**

Sida ardayda DDB oo dhan, ardayda dugsiyada imtixaanku waa inay ku nol yihiin siday dugsi uga galaan. Nidaamka cusub ee degenaanshuhu wuxu dhigayaa in codsadeyaalka idil ee sadexda dugsi ee imtixaanku (Boston Latin Academy, the O’Byrant School of Mathematics & Science and Boston Latin School) ee aan hada dhigan DDB waa inay soo cadeeyaan degenaanshahooda ugu dambayn Jimcaha ugu horeeya ee Febraayo siday dugsiga u galaan Sebtembarta soo socota. Codsadeyaasha aan keenin cadayn inay Boston ku nool yihiin ilaa Jimcaha ugu horeeya ee Febraayo looguma yeerayo inay galaan dugsi ah kuwa imtixaanka. Hadaad wax su’aal ah ka qabto sida loo galo dugsiyada imtixaanka, wac 617-635-9512.

### **Sidee u soo sheegi karaa tuhunka ah ku xadgudubka nidaamka degenaanshaha?**

Qoysas, shaqaale, arday iyo dadka kaleba waa soo sheegi karaan ku xadgudubka degenaanshaha iyadoo magac la’aan wacaya *Residency Tip Line*, 617-635-6775.

### **Waa maxay natiijada khayaamada degenaanshuhu?**

Ardaygii la ogaado inuusan ku nolayn Boston waa laga eryeyaa Dugsiyada Dadweynaha Boston. Ciqaabo kale – sida khasiraad iyo dacwo – waa lala tiigsan karaa qoysaska lagu helo inay ku xad gudbeen degenaanshaha. Qoysaska ardaydu racfaan marka hore waxay u qaadanayaan dhexdhexaadshaha (Ombudsperson), dabadeed Sarkaalka Fulinta Guud, ee go’aanka ugu dambeeya leh. Ardaygu waa ku jiri karaa dugsiga racfaanada maamuleed inta la dhamaynayo.

### **Hadaad su’alo dheeraad ah qabto...**

... Wac ama tag Xarun Waxtarmada Qoyska (FRC):

- Aga Waqooyi (Roxbury) 617-635-9010
- Aga Bari (Dorchester) 617-635-8015
- Aga Galbeed (Roslindale) 617-635-8040

... ama tag “web site”-ka DDB:

[www.bostonpublicschools.org/residency](http://www.bostonpublicschools.org/residency)